

05 August 2023

Waaladiinta iyo Ardayda Qaaliga ah ee DCSD:

Ku soo dhawow sannad dugsiyeedka 2023-2024! Sharaf ayay ii tahay inaan fursad u helo inaan idin adeego. Waxaan aad ula dhacay heerka balan qaadka iyo taageeradaada hagar la'aanta ah ee waxbarashada dadweynaha. Hamigeysa ku aaddan Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb waxaa ka mid ah balanqaadka sinnaanta iyo loo dhammaanshaha qeyb walboo shaqadeena ah. Waxaan aaminsannahay in dhammaan ardayda ay helaan waxbarasho tayo sare oo aan laga eegin asalkooda ama xaalada dhaqaalaha bulshada.

Qiyamyadeyda ugu muhiimsan, sida ku saleysan aqoonashada bani aadannimada- arkida qiyamka, qiimaha midba midka kale; ixtiraamida waxa mid walboo inaga ah bixinayo oo dadaalada lagu guul gaarsiinayo DCSD, ugu dambeyntii, hubinta guusha waxbarashada ee aqoonyahanadoo dhan.

Inagoo ku sii gudo jirno safarkaan ee "Carqaladeynta Heerka sare" - inaan ku dhiirano inaan si ka duwan u qabano waxyaabaha si loo gaaro natiijoyinka la rabo- aan xasuusano inaan xooga saarno fursadaha imaanayo sida ay keento carqaladeena wanaagsan. Waxaa ka sii muhiimsan, waxaan qof kasta oo naga mid ah kula tartamaya inuu muujiyo H-PRIDE maalin walba.




Lixda Qiyam ee ugu Muhiimsan Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb:

- H** **Aqoonsashada bani aadannimada**- Kahor intaan wax ka qaban shaqada muhiimka ee loogu gaarayo si wada jir ah Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb, waa inaan isku xirnaanaa sida bini'aadam marka hore. Aqoonsiga qiyamka iyo qiimaha oo aadan u arkeynin dadka kale kaliya sida illo iyo qaabab dhammaad leh.
- P** **Xirfadle nimada**- waa in lagu soo bandhigaa dhammaan wejyada nolosheenna xirfadeed iyo kuwa gaarka ah. Xeerkaan labiska, qaabka aan u wada xiriimo, la xisaabtanka, iyo illaalinta waqtiga waa qaar ka mid ah sifooyinka matalo xirfadlenimo.
- R** **Ixtiraamka**- Jawi shaqo oo xirfadle ah waxay ku dhisantahay ixtiraam guud. Waxaa isula dhaqanaa si xushmad leh, waan qiimeyana kala duwanaanshaha, oo waan ka mahadcelinaa aragtiyada kala duwan.
- I** **Sharafka**- waxay si dhow ula xiriirtaa xirfadle nimada laakin waxay ku lug leedahay daacadnimada, run sheegida, iyo anshaxa wanaag. Qaadashada masuuliyada falalkooda iyo illaalinta qarsoodiga markii loo baahdo.
- D** **Sharafka**- Ula dhaqan cadaalad ah ee shaqsiyaadka. Takoor la'aanta ku aadan shaqsiyaadka sababtoo ah jinsiyada, jinsiga, da'da, ama dooqa galmada. Xiriir furan oo daacad ah oo aan laga eegin jagada ama magaca waa lama huraa.
- E** **Danqashada**- Faham oo wadaaga dareemaha, aragtiyada, iyo waaya aragnimada dadka kale. Waxay ku lug leedahay aqoonsashada iyo qirashada shacuuraha iyo walaacyada dadka kale, iyo sidoo kale sida uga jawaabida si naxariis iyo taageero leh.

Waxaan kugu casuumay inaad igula soo biirtid markaan la falgalayo daneeyayaasha, sahminayo jaalalka bulshada, oo aan xoojinayo shaqaalaheena iyo ardayda. Si wada shaqeyn leh oo iskaashi leh, waxaan fullineyana oo aan ka howlgaleynaa heer sare inagoo muujineyno H-PRIDE maalin walba! Waxaan ku faraxsannahay inaan idin la adeego Aan yeelano sannad dugsiyeed cajiib ah!

Mahadsanid Adeeg ku jirista,

Dhaqtar Devon Q. Horton
Kormeeraha guud